# Habraaca Cabashada 4.50.030-P

Waxaynu ka war qabnaa marka qoysaskeenu ay ka qeybqaataan dugsiga caruurtooda, caruurtu intooda badani waxay noqdaan kuwa ku guuleysta waxbarashada, inay ka qalin-jabiyaan dugsiga sarre, inay dhisaan kalsoonida naftooda, iyo inay ka muuqato dabeecado xoogan oo dhinaca bulshada ah. Marka aynu qaadaneyno tallaabooyinkeena iyo go'aanadeena isla markaasina aynu udub dhexaad ugu dhigano caruurteena, markaasi waxaan dhammaan ardayda iyo qoysaska gaarsiin karnaa waayo-aragnimo wanaagsan. Waxaan sidoo kale ognahay in dugsiyada degmadeenu ay noqon karaan kuwa kakan taasina qoysaska iyo ardaydu ay su'aalo qabi karaan iyada oo mararka qaarkood walaaca ku saabsan manhajkeena, fasalada, barnaamijyada iyo waayo-aragnimo kale.

Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay soo dhaweynayaan dareenada lagu cabirayo sida fursadaha waxbarashada, caddeynta ku tallo-galkayaga, iyo in ka qeybqaadashada joogteynta horumarinta sidii ay dhammaan ardaydu uga faa'iideysan lahaayeen. Waxaan soo dhaweyneynaa wada hadaladaasi waxaanan dhammaan dadka waaweyn ka rajeyneynaa oo ay ka mid yihiin macallimiinta PPS iyo shaqaalaha kale, inay tusaale u noqon doonaa qiyamka aan u taaganahay- oo ay ka mid yihiin ixtiraamka, isku xirnaanta, daacadnimo iyo karaamo, iskaashiga, iyo go'aan ka qaadashada ku wajahan sinnaanta jinsiyadaha iyo cadaalada bulshada marka ay ka wada sheekeysaneyno arrimahaasi.

Marka arday ama qoys ay la soo gudboonaato dareen walaac lihi, waxaan ku dhiirigalinaa inay wada hadal si toos ah ula yeeshaan waaxda macallimiinta ee arrintaasi ugu lugta leh. Waxaa jira shaqaale kale oo fara badan oo Degmadu leedahay kuwaasi ay suurtagal tahay inay ku caawiyaan iyaguna, waxaa ka mid ah maamulayaasha oo dusha ka ilaaliya dugsiyada ama waaxyaha qaarkood. Dugsiyada degmadu waxa sidoo kale oo ay leeyihiin Xiriiriyaha Qoyska iyo Dugsiyada Degmada, kaasi oo idinka taageeri kara sidii aad degmada macluumaadka uga heli lahaydeen, sidoo kalena idinku xiriya shaqaalaha Degmada, iyo inuu idinka caawiyo wixii xal u helida u baahan tabashooyinka aad qabtaan.

Waxaan sidoo kale diyaar uga dhignay ardayda Dugsiyada Dadweynaha Portland, qoysaska, iyo sidoo kale bulshada kale ee degan degaanka Dugsiyada Degmada PPS Nidaamka Cabashada Rasmiga ah ee loo marayo Cabashada. Nidaamkani oo ay weheliyaan tilmaame maamul oo si ballaaran u sharxaya nidaamka. Dhammaan dhinacyada Cabashada Rasmiga ah soo gudbiyey waxaa loola dhaqmi doonaa si xushmad iyo Sharaf leh, iyada oo Dugsiyada Degmadu ay taageeri doonaan kuwa cabashada soo jeedinaya si uu nidaamku u noqdo mid la heli karo, oo daah-furan, iyo inuu ka tarjumo sida ay nooga go'an tahay xoojinta sinnaanta jinsiyadaha iyo cadaalada bulshada. Dugsiyada degmadu waxay si degdeg ah u xallin doonaan cabashooyinka sida ugu suurtagalsan iyada oo la raacayo sharciga gobolku u dhigay.

Dugsiyada degmadu waa inay abuuraan jawi soo dhaweyn leh oo ka tarjumaya isla markaana

taageeraya kala duwanaanshaha jinsiyadaha ardayda iyo bulshada. Hadafka degmadu waxa weeye in la helo nidaam cabashada loo maro kaasi oo soo dhaweynaya dhammaan ardaydeena, waalidiinta/daryeelayaasha iyo xubnaha bulshada PPS.

**I.** Cabashooyinka Rasmiga ah: Helitaanka: Tababarada: iyo Warbixinaha Sanadlaha ah

**A.** Sharaxaad dhammeystiran oo habraaca cabashada ah, oo ay ka mid yihiin dhammaan foomamka in laga helo xafiiska maamulka Degmada iyo bogga shabakada Degmada ee Xallinta Khilaafaadka oo laga heli karo halkan.

**1. Cabashooyinka Rasmiga ah**

Nidaamkani wuxuu ku siinayaa habkii aan ku xalin lahayd cabashada sida uu dhigayo Xeerka Maamulka Oregon 581-022-2370, oo ay ka mid yihiin, balse aan ku koobneyn, waxyaabaha la xiriira cabashooyinka:

a) Instructional standards and practices
   (1) Manhjka
   (2) Istaraatijiyada Wax Barista
   (3) Imtixaamida
   (4) La-talinta (tallo siinta)
   (5) Tirada fasalka
   (6) Barnaamijyada Waxbarashada ee Badiilka ah
   (7) Qalabka waxbarashada
   (8) Hoggaansanaanta nidaamyada gobolku u dhigay
b) Waxbarashada gaarka ah
c) Nabadgelyada iyo caafimaadka
d) Fursadaha sinnaanta waxbarashada
e) Nabadgelyada ciyaaraha
f) Xakameynta iyo/ama Is-gooniyeynta
g) Eex ama takoorka waxbarashada
h) Aargoosi lagu sameeyo ardayga ama waalidka/daryeelaha
i) In laga baaqsado baaritaanka cabashada eexda

**B.** Xogta ku saabsan nidaamka cabashada loo maro waa inuu noqdaa mid xubnaha bulshada dugsiga iyo dadka cabashada buuxinayaa ay si dhib yar u heli karaan.

**C.** Dugsiyada degmadu waxay tababar siin doonaan sida loo maareeyo cabashada caadiga ah iyaga oo raacaya nidaamka, sidoo kale iyada oo la raacayo amarada maamul ee uu dhigayo 4.50.031-AD.

**D.** Sababtoo ah cabashadu waxay tilmaan muhiim u noqon kartaa wanaaga hay'adda, guddoomiyaha waxbarashadu wuxuu siin doonaa Golaha Waxbarashada ugu yaraan sanadkiiba xogta, arrimaha cusub ee soo baxaya,iyo jawaabaha dugsiyadu degmadu ka bixiyaan, sidoo kale qiimeynta nidaamka rasmiga ah ee cabashada.

## II. WAQTIGA

**A.** Si loo baaro cabashada inta ay xusuustu cusub tahay iyo markhaatiyaasha iyo waliba ay suurtagal tahay in la heli karayo dukumentiyo fara badan waa in cabashada lagu soo gudbiyaa waqtiga soo socda ee lagu xadiday:

1. Labo sanadood gudahood ka dib markii xadgudubka eedeynta ama ay dhacday dhacdo sharci daro ahi ama la ogaaday eedeynta xadgudubka ama dhacdo sharci daro ah. Dhacdooyinka si caadi ah iskaga socda, waqtiga loo xadiday wuxuu dhamaadaa taariikhda ugu dhow ee dhacdadu dhacday' AMA

2. Sanad gudihii ka dib qalin-jabinta ardayda ay saameysay, guuray, ama si kale uga tahay dugsiyada degmada, labadaasi kolba midkii ugu dambeeyey.

**B.** Waqtiga lagu xadiday in lagu keeno cabashada rasmiga ah Dugsiyada degmadu waa ay kordhin karaan ee ku saabsan arrimaha nabadgelyada ardayga ee muhiimka ah, oo ay ka mid yihiin anshax xumada laga soo sheego shaqaale, xadgudubka ruqaansiga aan la ogoleyn, ama dhaqanka, ama eedeymo kale oo waxyeelo gaarsiinaya ardayda.

**C.** Helitaanka cabashadu way bilaabmaysaa 90-maalmood ee waqtiga xalka laga gaarayo cabashooyinka marka la eego nidaamka.

## III. SOO GUDBINTA CABASHADA RASMIGA AH

### A. TALLAABADA 1:

1. Cabashada qoraalka waa la soo gudbiyaa isku-xiraha cabashooyinka Degmada iyadoo qoraal ah, email ah, ama foomka qoraalka cabashada. The written complaint should include the name and contact information for Cabashada qoraalka waa inay qoran yihiin sharaxaad ku saabsan dhibta, iyo magaca ardayga, haddii ay khuseyso. Waxaad fiican haddii cabashada qoraalka ah sidoo kale ay ku jiraan magacyada dhinacyada kale ee cabashadu khuseyso, waxaana ka mid ah markhaatiyada; sharaxaadii dadaaladii lagu xalinayey arrinta; iyo soo jeedinaha lagu xalin karo. Qofka cabanayaa waa inuu helaa qoraal sheegaya in laga gudoomey waraaqihiisii cabashada muddo 5 maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalintii uu gudbiyey cabashad.

2. Inta badan xaaladaha, hoggaanka Degmada ee dugsiga arrintu khuseyso, ama kormeeraha waaxda ku shaqada leh, ayaa ka mas'uuliyada baaritaanka qaadanaya iyo inuu jawaab ka bixiyo cabashada Tallaabada 1aad. Guddoomiyaha Waxbarashadu waxaa suurtagal ah inuu u magacaabo cid kale oo go'aan ka gaarta Tallaabada 1aad sida ku habboon.

3. Dhammaan cabashooyinka rasmiga ah waxay go'aanka ku heli doonaan qoraal kaasi oo ka hadlaya cabasho kasta oo la soo gudbiyey iyo iyada oo ay ku jiraan sababaha go'aanka Degmada muddo 30 maalmood gudahood ah marka cabashadooda la helo, haddii aysan dhinacyadu ku heshiin in la dheereeyo waqtiga kama dambeysta ah. Xalka khilaafka waxaa ka mid ah xogta ku saabsan tallaabooyinka xiga nidaamka cabashada.

4. Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay aqbalaan in wixii cabasho rasmi ah si qarsoodi ah ee khuseeya Division 22matters loogu soo diro email halkani anonymouscomplaints@pps.net iyo in la soo waco telefoonka 503-916- 3462. Dadka cabashada sida qarsoodiga ah u soo diray waa inay

bixiyaan macluumaad ugu badan ee suurtagalka ah ee bixin karaan marka ay cabashadooda loo gudbinayaa. Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay baaris ku sameyn doonaan cabasho kasta oo loo soo gudbiyo, oo ay ka mid yihiin cabashooyinka qarsoodiga ah, si buuxda intii ay awoodu u saamaxdo.

## IV. CODSIGA RACFAANKA

### A. TALLAABADA 2: RACFAANKA LOO QAADANAYO GUDDOOMIYAHA

Haddii qofka soo gudbiyey cabashadu uu ku qanci waayo xalka arrinta laga gaaray,wuxuu guddoomiyaha waxbarashada ka codsan karaa inuu dib u eegis ku sameeyo arrintiisa. Codsiga dib u eegista waa in lagu soo gudbiyaa isaga oo qoraal ah muddo 10 maalmood gudahood ah marka qofka cabashada gudbiyey uu helo go'aanka Tallaabada 1aad.

1. Ka dib marka dib eegis lagu sameeyo agabyadii hore ee la soo gudbiyey ama la soo ururiyo iyo iyadoo la sameynayo dib eegis dheeraad ah, haddii ay lagama maarmaan noqoto, Guddoomiyaha Waxbarashada ama qof loo igmaday ayaa wuxuu soo saari doonaa go'aan qoraal ah oo kaga hadlayo dib eegista kasta oo ku saabsan qodobada laga cabanayo iyo sababta go'aanka iyada oo lagu siinayo go'aan qoraal ah qofka soo gudbiyey cabashada, iyada oo la raacayo xeerka OAR 581-022-2370. Dhammaan cabashooyinka racfaanka looga qaatay Guddoomiyaha Waxbarashadu waxay go'aanka heli doonaan muddo 30 maalmood gudahood ah oo ka bilaabmeysa maalinta la helay codsiga in dib eegis loogu sameeyo. Go'aanka waxaa ka mid noqon doona macluumaadka tallaabooyinka racfaanka dheeraadka ah ee u furan marka la eego nidaamkani.

2. Marka qofka cabanayaa uu helo go'aanka Guddoomiyaha Waxbarashada, haddii uu rabo inuu racfaan kale qaato, qofka cabanayaa waxaa suurtagal ah inuu racfaankiisa u gudbiyo Golaha Waxbarashada.

## B. TALLAABADA 3: RACFAANKA LOO QAATO GOLAHA WAXBARASHADA DUGSIYADA DADWEYNAHA PORTLAND(PPS)

Goluhu waxay u coddeyn doonaan racfaanka muddo 30 maalmod ah gudahood codsiga racfaanka ee go'aanka Guddoomiyaha Waxbarashada. Goluhu wuxuu heli doonaa diiwaan qoraal ah oo ku saabsan go'aanada Tallaabada 1aad iyo Tallaabada 2aad. Shaqaalaha Degmada iyo qofka cabanayaa waxay isweydaarsan doonaan macluumaad kasta oo qoraal kaasi oo xogta hore taasi oo ay rabaan inay u soo bandhigaan Golaha marka la dhageysanayo codsiga racfaanka ka hor ugu yaraan 24 saacadood dhageysiga racfaanka. Haddii macluumaad cusub lagu keeno wax ka yar 24 saacadood ka hor dhageysiga racfaanka ee Golaha, qofka cabanayaan wuxuu waydiisan karaa inay la siiyo waqti dheeraad ah. Qofka cabanayaan waxaa suurtagal ah inuu keeno caddeyn marka uu la dhageysanayo cabashadiisa. Goluhu waa inay go'aan ka gaaraan go'aankii uu gaaray Guddoomiyaha Waxbarashada ee ah:

1. In la xaqiijiyo sidii aan loo qaadi lahayn tallaabo dheeraad; ama

2. In laga noqdo iyada oo laga yaabo in la weydiisto Guddoomiyaha Waxbarashada inuu qaado tallaabo badiil ah u ah tallaabooyinka ama tallaabo kale oo la sameyn karo. Ilaa ay dhici karto in Goluhu ay wax ka bedelo ku sameeyaan go'aankii uu gaaray Guddoomiyaha Waxbarashadu, taasi waxay goluhu soo saari doonaan go'aan ka wax lagaga qabanayo arrin kasta oo walaaceeda lagaga hadlay cabashada iyada oo ay ku jiraan sababaha go'aanka Degmada.

Haddii qofka cabanayaa aanu ku qanacsaneyn go'aanka uu gaaray Golaha Waxbarashadu, qofka cabanayaa wuxuu racfaan u qaadan Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) si uu oggol yihiin xeerarka kala ah OAR 581-022-2370(4)(b) iyo OAR 581-002-0005.

## C. Noocyada Kale ee Cabashooyinka

Cabashooyinka ku saabsan Anshaxa Ku Ruqaansiga iyo Takoorka Jinsiga Qofku waa in loo gudbiyaa Waaxda Title IX ee halkan.

Cabashooyinka iyo warbixinaha ku saabsan xadgudbiyada ilmaha waa in si degdeg ah loogu gudbiyaa Khadka telefoonka Xadgudubka Ilmaha (ChildAbuse) ee 1-855-503-SAFE, sidoo kale kormeeraha Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS).

Macluumaadka dheeraadka ahee ku saabsan agabyada xallinta khilaafaadka waxaa laga heli karaa halkan.

## D. Qodobada kale

1. Dugsiyada Degmadu waxay siin doontaa addeegyada turjumida iyo turjumaan iyo wixii kale ee macquul ah sidii loo caawin lahaa qofka cabanaya inta uu ku jira habsocodka Cabashada Rasmiga ah. Tallo sharci inay siiso qofka cabanaya kama mid ah agabyada ay Degmadu bixineyso.

2. Wakiilka Degmadu u xilsaartay shaqaalaha barista iyo jawaab ka bixinta cabashadu waa inuu ka fogaadaa in aanu wax dan ka lahayn, ama u muuqan qof leh dano is-khilaafsan.

3. Qofka cabanayaa wuxuu keensan karaa garyaqaan ama qof taageera inta kulan kasta oo arrinta lagaga hadlayo socdo ama fadhiyada cabashadu socdaan.

4. Waxaa la adkeynayaa inaan la oggoleyn in laga aargoosto qof kasta oo gudbiyey cabasho ama ka qeybqaatay habsocodka cabashada. Falk aula kaca aargoosiga ahi wuxuu baajinayaa qof kasta oo macquul ah oo ka qeybqaato habsocodka. Qof kasta oo aaminsan inay waxyeelo ka soo gaartay aargoosi waa inay sida ugu degdeg badan ugu gudbiyaan warbixin Guddoomiyaha Waxbarashada ama Agaasimayaasha Golaha Waxbarashada PPS.

5. Dugsiyada Degmada waxay la wadaagi doonaan xogta cabashooyinka intii lala wadaagi karo ee suurtagal ah kuna saabsan natiijadii baaritaanka ka soo baxday iyo inay la wadaagi doonaan dhammaan kiisaaska wixii ka soo baxay cabashada baaritaankeedii. Si kastaba ha ahaatee, Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) marnaba inta badan waxayna oggoleyn in la bixiyo macluumaad gaar ah oo ku saabsan tallaabadii anshax marin ee laga qaaday shaqaalaha ama ardayga ay ku lug lahaa cabashadu. Goluhu waxay ku dhageysan doonaa cabashooyinka ku saabsan ardayda iyo shaqaalaha kulan ay albaabadu u xidhan yihiin haddii ayn shaqaalaha ama ardayda/qoysaskoodu codsan inuu kulanku noqdo mid dadka u furan.

6. Haddii Dugsiyada Degmadu ay ku guuldareystaan inay buuxiyaan waqtiga ay ku qeexan nidaamkani, qofka cabanayaa waxaa uu racfaan u qaadan karaa Golaha Waxbarashada PPS ama Waaxda Waxbarashada Oregon. Waxaa suurtagal ah in la dheereeyo heshiiska u dhexeeya qofka cabanaya iyo Dugsiyada Degmada. Tusaale ahaan, Tani waxay u baahan kartaa haddii ay jiraan markhaatiyaal fara badan in laga qaado xog waraysi, iyada oo markhaatigii ugu muhiimsanaa aan la heli karin sababtoo ah maalmaha fasaxa ah, fasaxa caafimaad, iwm., ama haddii kulan gaar ahi u shaqeeyo waayo qofka cabashada soo gudbiyey.

7. Sida iyada oo la addeegsaday nidaamkani, “maalmaha” waxaa loo tiriyey sida

" jadwalka maalmaha." Muddo kasta oo jawaabta nidaamkani ay ku soo beeganto labada maalmood Sabtida iyo Axada ee fasaxa la yahay ama maalmaha sharci ahaan fasaxa la yahay waxaa loo dheereyn doonaa maalmaha shaqada ee ku xiga.

8. Waxaa suurtagal ah in Dugsiyada Degmadu ayna xaqiijin karin inay qarsoodi ka dhigaan magacyada dadka soo gudbiyey cabashada marka la eego nidaamkani.

9. Haddii cabashadu ay eedeyneyso shaqaale ku kacay anshax-xumo taasi oo ka baxsan xadka nidaamkani, xiriiriyaha cabashadu wuxuu qoraal ku wargalin doonaa Guddoomiyaha Waxbarashada, iyo iyada oo Degmadu ku dadaali doonta inay jawaab ka bixiso cabashada waqtiga ku habeen.

10. Shaqaalaha hadda iyo kii horeba ma soo gudbin karaan cabasho marka la fiiriyo nidaamkani xaaladaha, shuruudaha, ama xaaladooda shaqaalanimo.

11. Cabashooyinkii markii hore la soo gudbiyey, la baaray, iyo laga jawaabay iyo kuwii racfaankoodii lagu guuleysan waayey ama waqtigii ay racfaanka ay ka qaadan lahaayeen dhacay taasi oo waliba aan dib loo gudbin karin marka cabashadu ay ku saabsan tahay dhacdo gaar ah ama arrin markii horeba laga hadlay iyada oo la marayo Nidaamka Cabashada Rasmiga ah.

12. Eedeymo dheeraad ah oo la soo gudbiyey intii lagu jiray Tallaabada 2aad lalama dhageysan doono cabashadii asalka ahayd. Qofka sameynaya cabashada waxaa la ogeysiin doonaa in eedeynta laga hadli doonin inay qeyb ka noqoto jawaabta Tallaabada 2aad iyada oo eedeyntaasi loo gudbiyo xiriiriyaha Dugsiyada Degmada sidii ay tahay cabasho cusub.

13. Sababtoo ah Golaha Waxbarashadu waxay yihiin kuwa qaata go'aanka kama dambeysta ah ee rafcaanka Tallaabada 3aad, xubnaha Goluhu waa in ayna si ula kac ah bilaabin ama u sii wadin xiriirka mawduucyada ku saabsan cabashada ama si madax bannaan u baarin eedeemaha cabashada la soo gudbiyey. Shaqaalaha Degmadu waxay si joogta ah u wargalin doonaa xubnaha Golaha Waxbarashada arrimaha ku saabsan cabashooyinka rasmiga ee la soo gudbiyey.

## E. Cabashooyinka ka dhanka ah Guddoomiyaha Waxbarashada ama xubmaha Golaha Waxbarashada

Cabasho kasta oo ku saabsan eedeyn qof anshax-xumo sameeyey Guddoomiyaha Waxbarashadu (laakiin aan ahayn tallaabada Degmada taasi oo Guddoomiyuhu ay suurtagal tahay inuu leeyahay mas'uuliyada kama dambeysta ah maadaama uu yahay Sarkaalka Maareeyaha Dugsiyada Degmada) kaasi oo dusha kala soconaya Golaha Waxbarashada.

Xubnaha Golaha Waxbarashadu waxay yihiin xubno ku shaqeeya mutadawacnimo iyaga oo la doortay sidoo kalena waxaa la xisaabtama dadweynaha degmada

Dugsiyada Dadweynaha Portland wixii ay sameeyaan iyo siyaasadoodu waxay tahay. Cabashooyinka la xiriira xadgudubyada anshaxa ama xadgudubyada ka dhanka ah sharciga ee uu sameeyo qof ka mid ah xubnaha Golaha waa in lala socodsiiyaa Guddoonka Golaha kaasi oo u gudbin doona hay'adaha caddaalada ee ay khuseyso wax ka qabadkeena leh ama dhinac saddexaad haddii inta badan ee goluhu ay ansixiyaan in loo gudbiyo. Cabashooyinka la xiriira xadgudubyada anshaxa ama xadgudubyada ka dhanka ah sharciga Guddoonka Goluhu waa inuu la socodsiiyo Guddoomiye-xigeenka Guddoonka(xigeenada) kuwaasi oo uu gudbin doona arrimaha hay'ada dawlada ee ay khuseyso ee xaqa u leh inay baarto ama qeybta saddexaad haddii ay isku raacaa inta badan ee Goluhu ay ansixiyaan in la gudbiyo. Haddii qeybta saddexaad ay baarto cabashada, ka dib marka ay helaan natiijada barista, Golaha ayaa go'aan ka gaaraya muddo dhan 30 maalmood, iyada oo kulan albaabadu u furan yihiin kaasi oo lagaga hadlayo waxa ay tahay tallaabda la qaadayo, haddii in tallaabo laga qaado loo baahan yahay.

## F. Cabashooyinka ay soo gudbiyeen Xubnaha Golaha Waxbarashadu

Xubnaha Golaha Waxbarashada Dugsiyada ee shacbiga ay metelaan iyo shaqaaluhu ay soo gaadhsiiyaan cabashooyin rasmi ah waa inay u gudbiyaaan cabashooyinkaasi xiriiriyaha cabashada Dugsiyada Degmada. Xubnaha Golaha Waxbarashadu waa inay u gudbiyaan cabashada rasmiga ah dugsiga ku haboon ama waaxda sidii ay arintan wax uga qaban lahaayeen.

## V. XUQUUQAHA DHEERAADKA AH EE RACFAANKA

Haddii cabasho kasta oo eedeynta xadgudubka Xeerka Maamulka Oregon(OAR) Cutubka 581, Qeybtiisa 22 ( Standards), Xeerka Dib Loo Eegay (ORS) 339.285 ee lala akhriyo 339.383 ama OAR 581-021-0550 ee lala akhriyo 581-021-0570 ( Is-xakameynta iyo Is-gooniyeynta), ama ORS 659.852 ( Aargoosiga), iyo in aan cabashada lagu xalin habkii nidaamkii cabashada, qofka cabanayaa, kaasi oo ah arday, waalid ama daryeele degan deegaanka Degmada, waxa uu racfaan ka qaadan karaa go'aankaasi kama dambeysta ah ee uu gaadhay Dugsiyada Degmadu isaga oo racfaanka u gudbisanaya Guddoomiye-xigeenka Guddoomiyaha Waxbarashada Casharada Dadweynaha sida uu dhigayo Xeerka Maamulka Oregon (OAR) 581-002-0005.

Haddii cabashada eedeyntu ay ku salaysan tahay takoor kaasi oo u dhigayo xeerka ORS 659.850 (Takoorka Waxbarashada), qofka cabanayaa wuxuu racfaan ka qaadan karaa go'aanka kama dambeysta ah ee Degmadu gaartay isaga oo racfaankiisa u gudbinaya Waaxda Waxbarashada Oregon ama wuxuu u gudbin karaa cabashadiisa si toosa Waaxda Waxbarashada Federaalka Maraykan isaga oo u baahneyn inuu ka daalo nidaamyada Degmada ee sharcigani dhigayo.

Intaasi waxaa dheer addeegsiga nidaamka cabashada Degmada, cabashooyinka Waxbarashada Gaarka waxaa iyaga si toos ah loogu gudbin Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon. Qofka cabanayaan waa inuu u diraa isla mar qudha nuqulka cabashada Degmada iyo Waaxda Waxbarashada.

La qaatay 11/2014; Wax ka bedel lagu sameeyey 6/12/18, 6/15/2021

---

**Tixraacyada Sharci:**

ORS 192.610 to 192.690
ORS 332.107
ORS 339.285 to 339.383
ORS 659.852
OAR 581-022-2370